

## Taageerada Waxbarashada Carruurta Ingiriiska Barta asagoo noqonaaya Baaraha Erayga

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

*Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES*

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay baran karaan erayo cusub maalin kasta ayagoo dhagaysanaaya, ku hadlaaya, qoraaya, ama sawiraaya. Ujeedada shaqadaan waa in laga caawiyo carruurta inay akhriyaan qoraalka macluumaadka ah ayadoo la barayso kuna tababaranaaya adeegsiga tiro yar oo erayo cusub ah oo lagasoo qaatay qoraal. Waxaad taageeri doonta cunugaaga intaad akhriyayso, hadlayso, sawirayso, ku ciyaarayso, ama qorto erayo cusub.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku barashada erayada cusub luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!



### Maxaa loo barayaa erayada?

Ku hadalka, akhrinta, qorista, iyo ku ciyaarida erayada cusub maalin kasta ayaa ka caawisa carruurta inay dhisaan eray bixintooda.

**Yoolka Waxbarashada:** Carruurta waxay dhisi doonaan eray bixintooda ayagoo adeegsanaaya erayada cusub

**Buundooyinka:** Fasalka birimada–5aad

**Agabka:** Buug ama qoraal macluumaad bixinaaya, waraaq iyo qalin qori, qalin, qalimaanta midabka, ama qalin koobi, maqas

### Aan baarno erayada!

Raac tallaabooyinka soo socda. Aan gadaal ka eegno taageerooyinka luuqada oo dheeraad ah.

**Talaabada 1 aad: La akhri sheego ama qoraal xog bixinaaya** cunugaaga. Waxay noqon kartaa wax lagasoo qaaday shaqada dugsiga ee xisabata, sayniska, cilmiga bulshada, ama Ingiriiska, ama mid meel kale katimid sida wargayska.

**Talaabada 2 aad:** Si wadajir ah, **doorta 5-8 eray oo aad kasoo qaadataan qoraal** si cunugaagu ugu tababarto dhawr maalmood gudahood. Dooro erayada cusub ama xiisaha leh, erayada marar badan kasoo muuqda qoraalka, erayada iskumidka ah Ingiriis ahaan iyo luuqadaada hooyo labadaba, ama erayada macnoyaasha badan leh. Carruurta yaryar waxaad dooran kartaa erayo intii hore kayar ama waxaad diirada saari kartaa xaraf keliya ah iyo sidoo kale.

**Talaabada 3 aad: Diirada saar hal eray** maalin kasta; carruurta yaryar ayaa diirada saari kara xaraf. **Adigga iyo cunugaaga ayaa ku qori kara erayga** cad waraaq ah. **Ka hadal** erayga, **ka raadi** erayga qoraalka, **qex** erayga, u sheeg waxa uu yahay iyo waxa uusan ahayn, kana jawaab su'aalo kasta oo uu ka qabi karo erayga.

**Talaabada 4 aad:** Cunugaaga ayaa **dhagaysan kara kadibna raadin kara eraygaas** maalinta oo dhan, asagoo xisaabinaaya inta jeer ee uu arko ama maqlay erayga Ardayda waawayn ayaa qoran kara liiska meesha ay ku arkeen ama ka maqleen erayga.

**Talaabada 5 aad:** Hubi siduu wax ku wado oo **su'aalo ka waydii erayga**, adoo xariiro la samaynaaya maaliintiisa. Meeqa jeer ayuu maqlay erayga? Sidee ayuu ahaa? Cunugaaga ayaa qori kara jumlad ama sawiri kara sawirka sida ama meesha uu ku arkay erayga oo la adeegsanaayo.



## Noocyada Qoraalka Xogta ee Cunugaagu Baranaayo

- Buugaagta, sheekooyinka, muuqaallada, ama webseedyada wadaaga xaqiiqooyinka ku saabsan wax (xayawaannada, miraha, cimilada, ciyaaraha)
- Shaqada dugsiga
- Bokisyada seeriyaalka
- Maqaallada wargayska
- Qoraalka lagasoo qaado wargayska
- Tilmaamaha (sida loo ciyaaro ciyaar, loogu shaqeeyo boonbale cusub, iwm.)

## Qaababka aad Adigga iyo Cunugaagu Ku baran Kartaan Erayo Cusub si wadajir ah

- Qor (ama raad-raac) erayga
- Ka hadal macnaha erayga; Ka fikir erayada leh macnaha isku mid ah
- Sawir ama qor sawirka erayga
- Raadi erayo leh laxanka erayga (ama adigga abuur)
- Eray ku dhex isticmaal jumlad
- Ku sacabi dhawaaqyada erayga
- Kala goo erayga kadibna dib iskugu celi
- Hinkaadi erayga
- Kala qaybi xarfaha si aad uga samayso erayo cusub
- Abaal marin: Fiiri qaybaha erayga (erayada yaryar ee ku dhex jira erayga dheer, salka danbe ee erayada, biloowga erayga, dhexda erayga)



## Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Iskuday inaad adeegsato su'aalaha iyo jawaabaha hoose intaad ka hadlayso erayada cusub adoo kaashanaaya cunugaaga.

Su'aalaha la iska waydiiyo Erayada Cusub	Jawaabaha Ilmaha
Waa maxay erayga aad baratay maanta?	Maanta waxaan bartay erayga ____.
Muxuu eraygaas kaaga dhigan yahay?	Erayga aan bartay, ____, macnihiisu waa ____.
Ma ka fakari kartaa erayada qaarkood oo isku macno ah?	Erayga la micnaha ah erayga kale waa ____.
Muxuu noqon karaa erayga kasoo horjeeda eraygaan?	Erayga kasoo horjeeda eraygaga waa ____.
Xagee ayaad ka helayaa eraygaan maanta?	Maanta waxaan eraygaan ka helay ____.
Iskuday inaad eray jumlad ku dhex isticmaasho. Ma ku dari kartaa naftaada ama saaxiibadaa jumlada?	